Jamhuuriyadda Soomaaliya Xukuumadda Federaaliga KMG ee Soomaaliya Xafiiska Ra*iisul Wasaaraha



جمهورية الصومال لحكومة الانتقالية الفيدرالية مكتب رئيس الوزراء

Date: 17.02.2011

The Transitional Federal Government of the Somali Republic Office of the Prime Minister

Ref: XRW/00000.130/02/11

Ku: Gudoomiyaha Golaha Baarlamaanka

Mudane: Shariif Xasan Sheikh Aadan

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya

Mudane: Shariif Sheikh Axmed

Ujeeddo: Soo Gudbin Go'aanki Golaha Wasiirada

Mudane Gudoomiye,

Waxaan si xushmad iyo qadarin leh laguugu wargalinayaa in kalfadhigii Golaha Wasiirrada ee summadiisu ahayd SHGW.0000.13/02/11 taariikhduna ahayd 17/02/2011 ay Golaha Wasiirada kaga doodeen habraaca marxaladda kala guurka iyo qorshaha siyaasadeed ee xukuumadda oo ku aadan arrintaas.

Hadaba, waxaan halkaan kuugu soo gudbinaya go'aankii Golaha Wasiirada ay ku taageereen mudda kordhinta seddexda sana ah ee barlamaanka uu horey u gaaray iyo waliba qorshe ku aadan sidii loo soo afjari lahaa xilliga KMG ah.

Mudane Gudoomiye, waxaan halkaan kuugu soo lifaaqay qorshihii ay Golaha Wasiirada soo gaareen, kaana codsanayaa inaad hor gaysid Golaha Barlamaanka si ay u ansixiyaan.

Mahadsanid

Mudane: Maxamed Cabdullahi Maxamed

Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka KN

Soo jeedin mawqif isku-soo dhoweyn ee DFKM ee xilliga kalaguurka

Hordhac:

Iyadoo la tixgelinaayo doodda ka socota habraaca lagu soo afjarayo xilliga kala guurka Baarlamaanka Soomaaliyeed wuxuu gaaray go'aamada soo socda:

- In uu kordhiyo mudada jiritaanka Baarlamaanka saddex sano oo ka bilaabmaysa 21 August 2011 kuna dhamaanaysa 20 August 2014.
- In la doorto Afhayeenka Baarlamaanka iyo ku xigeendiisa kadibna Madaxweynaha inta ka horaysa 20ka August 2011.

Go'aankan oo ku salaysnaa baahi loo qabay in la kordhiyo xilliga Baarlamaanka DFKM inta ka horaysa 20ka February, 2011 si aan baarlamaanku u gabin masuuliyadiisa iyo awoodiisa sida ku cad Axdiga.

Mawqifka beesha caalamka inteeda badan ee ku aaddan go'aankii Baarlamaanku waqtiga ku kororsaday waxay ahayd mid diidmo ah. Waxayna u arkeen waqti kororsigan in uusan habooneeyn oo aan wada tashigii loo baahnaa in lala sameeyo qaybaha kale ee Dawladda Soomaaliya, shacabka Soomaaliyeed iyo beesha caalamkaba uusan dhicin.

Xukuumadda DFKM waxaan doonaysaa in la gaaro xasilooni siyaasadeed iyo mid amni ee loo baahan yahay si loo dhamaystiro hawlaha kala guurka isla markaana loo abuuro kala dambayn sharci ku salaysan iyo weliba isbeddel lagu sameeyo haya'adaha Dawladda FKMG si Soomaaliya looga saaro xaaladda ku meelgaarnimada ah loona gaarsiiyo inay noqoto dawlad buuxda. Waxaa lagama maarmaan ah in Soomaaliya mar kale la gaarsiiyo midnimo lagu helo Dastuur Federaali ah oo la isku raacsan yahay shacabkuna ku ansixiyo afti guud.

Haddaba, iyadoo la tixgelinaayo arrimaha aan kor ku soo sheegnay, waxaan soo jeedinaynaa talooyinka soo socda, oo saldhig u noqon karta wada tashi balaaran iyo mawqif mideesan oo ay isku raaci karaan umadda Soomaaliyeed iyo beesha caalamku:

- In la lagu raaco kordhinta muddada saddexda sano ah ee baarlamaanku go'aansaday oo ay noqoto gundhigga lagu gaaraayo ujeedooyinka iyo tilmaamaha soo socda:
 - a. In dhammaan Ha'yadaha Dawladda Federalka loo kordhiyo mudada ay shaqeynayaan (si loo dhamaystiro hawlaha qabyada ah sida amniga, dib u hishiisiinta, dastuurka, hannaanka dawlad wanaaga iyo toosinta dhaqaalah) inta laga gaaraayo August 2012;
 - b. In doorashada Afhayeenka Baarlamaanka, kuxigeenadiisa iyo tan Madaxweynaha Jamhuuriyadda ay dhacaan bisha Luuliyo (July) iyo Agoosto (August) 2012 sida ay isugu xigaan.
 - c. In la dhamaystiro habraacii isbeddelada Baarlamaanka lagu samaynayey sanadka labaad oo ah August 2012 ilaa August 2013;
 - d. Ka dib marka Baarlamaanka dib u habeyn lagu sameeyo ayaa Dowladdaa sannadka ugu dambeeya 2013-2014 diyaarineeysa afti qaran iyo doorashooyin guud.

Xukuumadda DFKM waxay kalsooni ku qabtaa in soo jeedintani ay waafaqsantahay baahida aan kor soo sheegnay ee loo qabo xasiloonida iyo isbeddelka isla markaana loo cusboonaysiiyo sharciyadda. Sidaa awgeed waxaan ku dhiiri gelinaynaa dhamaan inta danaysa arrimaha Soomaaliya in ay taageeraan soo jeedintan oo ay noqoto meel laga bilaabo hawlaha deg-degga ah ee nalooga baahanyahay si loo xoreeyo dibna loogu dhiso Soomaaliya iyadoo loo dhanyahay lagana wada tashady.

Golaha Wasiirrada

Mogadishu, February 16, 2011